

Siyaasadda JO- Shaqaalaynta Ardayda

Qawaaniinta rasmiga ahi dhammaantooda sida tan gudaha, gobolka, iyo dowladda dhexe waxay xukumayaan shaqo siinta dhammaan dadka yar ee ay da'adoodu ka hooseyso 18 sano. Qof kasta oo ay da'adiisu ka yartahay 14 ama 15 oona jeceyl in uu shaqaysto maalmaha dugsiga uu jiro ee ah inta lagu guda jiro saacadaha dugsiga marka hore waa in uu damaana qaadaa oggolaanshaha fasaxa dugsiga.

Ayada oo loo hoggaansamayo qaanuunka, maamulaha dugsiga ama qorshe dejiyaha ayaa soo saari doona shahaadooyin da'da ardayda ku saabsan kuwaasi oo da'adoodu ka hooseyso 18 sano ayada oo sidaasna loo samaynayo codsiga qofka loo shaqeeyo ama qofka lafilayo in loo shaqeeyo. Maamulaha ama qorshe dejiyaha ayaa masuul ka noqon doona soo saarida oggolaansho fasax siin oo lasiinayo ardayda da'adoodu tahay 14 ama 15 si ay u shaqeeyaan maalmaha dugsiga uu jiro oo ah inta lagu guda jiro saacadaha dugsiga, sida qaanuun ahaan la isaga rabbo.

La ansixiyay 19 Agoosto, 1971

Dib loo muraajaceeyay si loo waafajiyo habdhaqanka: taariikhda ansixinta buuga tusaalaha bixiya

TIXRAACA SHARCIGGA AH.: C.R.S. 8-12-105 (2),(3)

C.R.S. 8-12-111

C.R.S. 8-12-113

C.R.S. 8-12-114

C.R.S. 8-12-117